# FAQ – Wakaaladda Meelaynta Ilmaha(CPA) – aan ahayn CPS ama Baadhisaha Cabashada Liisanka

**Q Waa maxay Qeybta Sharciga (LD) Aan ahayn CPS ama baadhista cabashada sharciga?**

**A** *Marka Department of Children, Youth & Families (Waaxda Carruurta, Dhallinyarada iyo Qoysaska, DCYF) ay hesho cabashada guri korinta sharciga leh kaas oo aan lahayn eedaymo xadgudub ilmo iyo/ama dayacaad balse laga yaabo inay xadgudub ku tahay Washington Administrative Code (Xeerka Maamulka Washington, WAC), macluumaadkaas waxa lagu baadhaa qaadashada aan ahayn CPS.*

**Q Dhammaan qaadashada aan CPS ahayn ma waxay keentaa baadhitaan?**

**A** *Maya, waxay ku xidhan tahay waxa la sheego. Haddii cabashadu ay muujiso xadgudub WAC, waxaa laga yaabaa in la baadho si loo go'aamiyo inuu jiro xadgudub.*

**Q Yaa dhameystiraya baadhitaanka?**

**A** *DCYF waxay ogeysiin doontaa sharciga CPA-gaaga qaadashada u baahan baadhitaanka. Sharci bixiyahaaga CPA ayaa bilaabi doona baadhitaanka.*

**Q Waa maxay tusaalooyinka shilalka uu baadhay baadhaha cabashooyinka?**

**A** *Tusaalooyinka shilalka uu baadhay baadhaha cabashooyinka waxa ka mid ah, laakiin aan ku koobnayn dhaqamada anshax marinta, habacsanaanta kormeerka, korin la'aanta iyo kalgacalka, maaraynta daawada, warbixinta oo aan la soo sheegin, iyo walaacyada deegaanka.*

**Q Sideen ku ogaan karaa haddii uu jiro baadhitaan?**

**A** *Sharci bixiyahaaga CPA ayaa kula soo xidhiidhi doona meesha ugu horaysa ee baadhistu socoto, taas oo aan khatar galinayn badbaadada ilmaha ama daacadnimada baadhista. Waxa laga yaabaa inay kaala soo xidhiidhaan telefoon ama shakhsi ahaan, waxaana laga yaabaa inay gurigaaga ku yimaadaan iyagoon ogeysiin.*

**Q Maxaa la iiga sheegi doonaa danbi-baarista?**

**A** *Inta lagu jiro wareysigaaga, waxaa lagugu wargelin doonaa eedeymaha ama walaacyada la soo sheegay. Sharci bixiyahaaga CPA ayaa kula wadaagi doona macluumaadka ugu badan ee suurtogalka ah iyada oo aan khatar gelinaynin sumcada baadhitaanka. Macluumaadka ku saabsan tixraacaha, ama qofka cabanaya, lalama wadaagi doono.*



**Q Ma la wadaagi karaa baaraha cabashada ee CPA-gaaga (waxay u badan tahay waalidka korinta ee CPA sharciga ah) aragtidayda?**

**A** *Haa, taasi waaba ujeeddada wareysiga. Tani waa wakhtigaaga si aad u sharaxdo xaaladda iyo fursadaada aad ku bixin karto macluumaad kasta oo kale oo khuseeya ama dhukumenti. Waxa kale oo aad la xidhiidhi kartaa baadhaha cabashada wakhti kasta si aad ula wadaagto xog kasta oo dheeraad ah ama aad waydiiso su'aalo ku saabsan baadhitaanka.*

**Q Ma u soo gudbin karaa hadal qoraal ah?**

**A** *Haa, waxaad soo gudbin kartaa hadal qoraal ah Haddii la helo ka hor inta aan la dhammaystirin baadhitaanka, waxaa loo tixgelin doonaa qeyb ka mid ah baadhitaanka. Dhammaan bayaannada iyo dhukumentiyada la bixiyay waxaa lagu ridi doonaa faylka.*

**Q Qof ma ila joogi karaa markaan wareysigayga galayo?**

**A** *Haa, waxaa laga yaabaa inaad haysato qof dhexdhexaad ah, qof weyn oo gacan saddexaad ah oo jooga inta waraysigu socdo ilaa inta aad saxeexday foom oggolaanshaha si aad macluumaadka wadaagto oo aanay khatar gelinaynin daacadnimada baadhista.*

**Q Yaa la waraysan doona inta baadhistu socoto?**

**A** *Inta baadhistu socoto, dhammaan carruurta la korsado ee guriga ku jirta waa la waraysan doonaa oo sharci bixiyahaaga CPA waxa laga yaabaa inuu ku weydiiyo fasax uu ku wareysto ilmahaaga (carruurtaada). Dhammaan dadka waaweyn ee guriga jooga, shaqaalaha kiiska, markhaatiyada, ama xidhiidhada dammaanadda ee leh macluumaadka la xidhiidha waxa laga yaabaa in sidoo kale la wareysto.*

**Q Boolis ma ku lug yeelanayaan?**

**A** *Haddii dambi lagu soo eedeeyo, baadhaha LD/CPS waxay u badan tahay inuu ku lug leeyahay oo ogeysiin doona sharci fulinta. Qolada fulinta sharciga ayaa go'aan ka gaadha inay baadhaan iyo in kale. Haddii qolada sharci fulinta ay doortaan inay baadhaan, LD/CPS baadhaha wuxuu dib u dhigayaa fulinta sharciga oo iyagaa hogaaminaya baadhitaanka.*

**Q Wakhti intee le'eg ayey danbi-baaristu qaadan doontaa?**

**A** *Waxaa lagu dadaalayaa in baadhitaannada lagu soo gabagabeeyo 45 maalmood gudahood; si kastaba ha ahaatee, baadhitaanada qaar ayaa laga yaabaa inay qaataan waqti dheer.*

**Q Gurigeyga ma la keeni doonaa carruur kale oo la igu ogaanayo korintooda danbi-baaristu inta ay socoto?**

**A** *Go'aankan waxa loo samayn doonaa kiisba kiis. Carruurta laguma meelayn doono gurigaaga haddii Qeybta Sharciga ama CPA ay go'aansato inay ku soo saarto Gudbin la'aan sharcigaaga ama haddii aad codsato inaadan meelayn carruurta inta lagu jiro baadhitaanka. Haddii tixraac aan ikhtiyaarka ahayn la soo saaro, waxaad heli doontaa ogeysiin.*

**Q Gurigeyga ma laga kaxeyn doonaa carruur kale oo la igu ogaanayo korintooda danbi-baaristu inta ay socoto?**

**A** *Carruurta la korsado ayaa mararka qaarkood laga saaraa inta lagu jiro baadhitaanka. Go'aankan waxa loo gaaro waa si loogu dedaalo arrimaha badqabidda carruurta. DCYF Adeegga Ilmaha waa masuulka sharciga ah ee guryaha carruurta lagu qoro si loogu koriyo oo waajib ayey ku tahay inay ka kaxeeyaan carruurta markii ay muhiim tahay ee lagu dedaalayo badqabiddooda iyo fayaqabkooda. Qeybta sharciga ma gaadho go'aano meelayn ah laakiin waxa laga yaabaa inay macluumaadka la wadaagto daryeelka carruurta si ay uga caawiso go'aannada meelaynta.*

**Q Ka warran carruurta qabiillada dhaladka dalkan ee aan hayo?**

**A** *Qabiilka(qabiilada) waa la ogaysiin doonaa baadhista waxayna samayn doonaan go'aan meelayn ah oo ku saabsan carruurta lagu hayo daryeelka iyo xannaanada.*

**Q Ma guryahooda ayaa lagu celinayaa carruurta lagu koriyo guryo lagu ogyahay marka danbi-baaristu dhammaato?**

**A** *Arrintan waxay ku xiran tahay natiijada ka soo baxda danbi-baarista iyo waxa ay ku jirto danaha carruurta.*

**Q Maxay yihiin natiijooyinka suurtagalka ah ama natiijooyinka baadhitaanka sideese la ii ogeysiin doonaa?**

**A** *Natiijooyinka baadhitaanka sharci siinta ama natiijooyinka waa laba mid uun "Wax sax ah" ama "Wax aan ansaxeynin." Waxaad heli doontaa ogeysiin qoraal ah marka baadhitaanku dhammaado. Helitaanka sharci-siinta "Saxda" macnaheedu waa inay jirto sabab macquul ah oo lagu aamino xadgudubka WAC inuu dhacay. "Ma ansaxayo" macnaheedu waa inay jirto sabab macquul ah oo lagu aamino xadgudubka WAC ma dhicin ama aan la go'aamin karin haddii xadgudub dhacay. Dhammaan natiijooyinka sharci bixinta ee saxda ah waxay ku xidhan yihiin ficillada sixitaanka, tababarka, iyo/ama tababarka si loo helo u hoggaansanaanta WAC.*

**Q Maxaa dhacaya haddii aan diido helitaanka?**

**A** *Haddii aadan ku raacsanayn natiijada, waxaad bixin kartaa bayaan qoran si loogu daro faylka sharciga.*

**Q Ma codsan karaa koobbiga danbi-baarista?**

**A** *Haa, waxaad codsi ku samayn kartaa siidaynta dadweynaha:* ***dcyf.publicdisclosure@dcyf.wa.gov****.*

**Q Halkeen ka heli karaa nuqul ka mid ah shuruudaha WAC?**

**A** ***https://app.leg.wa.gov/WAC/default.aspx?cite=110-148***

**Q Anigoo ah waalid shati lagu siiyey korinta carruur la igu ogyahay, halkee baan macluumaad dheeraad ah ka helayaa?**

**A** ***www.dcyf.wa.gov/services/foster-parenting***

## Foster Intervention and Retention Support Team (Kooxda Taakuleynta Barbaarinta ee Waalidka Koriya Carruurta ay hayaan, FIRST)

FIRST waa kheyraad ay heli karaan waalidiinta korinta si ay ku siiyaan caawimaad inta lagu jiro baadhitaanka. Waxa kale oo ay dadka u sii gudbiyaan meelo kale oo muhiim ah. Waxaad xafiiska FIRST kala soo xiriiri kartaa 866-393-6186.

*DCYF ma takoorto waxayna usiisaa helitaan siman barnaamijyadeeda iyo adeegyadeeda, dhamaan dadka iyadoon loo tixgalin isirka, midabka, jinsiga, diinta, caqiidada, xaalada guur, dhalashada, rabitaanka galmo, da'da, xaalad ciidan ama jiritaanka naafo jidheed, dareen ama maskaxeed.*

*Haddii aad rabto nuqullo dhukumenti ah oo qaab kale ah ama luuqad kale ah, fadlan kala xidhiidh DCYF Constituent Relations (DCYF Xidhiidhada Qaybaha) 1-800-723-4831 ama iimaylka* ***communications@dcyf.wa.gov****.*

DCYF PUBLICATION LIC_0146 SM (12-2023) Somali